

Soo Dhowoow!

Hay'adda Adeegyada Bulshada (Agency of Human Services) waxay bixisaa taageero, adeegyo isla markaana waxay taageertaa dadka reer Vermont oo da' walba ah iyadoo u sii maraysa mashruucyo badan iyo ururo bulshadeed. Fadlan eeg liiska soo socda si aad u aragto sida aanu kuu caawin karno.

- Caruuta la korsado (Adoption)/meelaha caruurta lagu hayo (foster care)
- Horumarka cunuga
- Ilaalinta cunuga
- Taageerada cunuga
- Xanaanada caafimaadka
- Caymiska caafimaadka
- Taageerada raashinka
- Guryaha / meelaha lagu hooydo (shelter)
- Taageerada shidaalka
- Korontada
- Tageerada telefoonka
- Xanaanada cunuga
- Xanaanada dadka waayeelka ah
- Caafimaadka maskaxda iyo iyo wanaaga dareenka (Mental health and emotional wellbeing)
- Adeegyada curyaanimida, adeegyada dhagoolayaasha, adeegyada indhoolayaasha
- Shaqada
- Dakhliga ku soo gala
- Taageerada sharciga
- Ilaalinta
- Gaadiidka

Si aad u ogaato halka aad adiga iyo qoyskaaga ka heli kartaan taageerada, wac Vermont 2-1-1.

Ka wac 211 telefoonka gurigaaga.

Ugu sheeg Ingiriis ahaan qofka ka jawaaba telefoonka, "I want an interpreter who speaks (Somali)."

Sug telefoonka dhowr daqiiqo inta uu 2-1-1 uu samaynayo isku xirka adiga iyo tarjumaanka.

Tarjumaanka iyo qofka 2-1-1 ayaa adiga kugula hadli doona telefoonka.

Qofka 2-1-1 waxa uu ku waydiin doonaa nooca taageerda aad u baahan tahay. Qofka waxa uu kuu sheegi doonaa barnaamijyada ama ururada ay dhici karto inay awoodaan inay adiga ku caawiyaan iyo sidii aad iyaga ula xiriiri lahayd.